Royal College of Anaesthetists

# Suuxdin – khataraha iyo saamaynta xun

# Dareemidda xanuun iyo inaad jirantahay

Ku saabsan buugyarahan. Buugyarahani wuxuu ka hadlayaa **dareemidda xanuun (lalabo)** ama **inaad jiran tahay (matag) kadib qalliinka.** Tani waa saamaynta xun ee aad dareemi karto haddii aad gasho suuxdin guud. Waxay sharxaysaa sababaha keena xanuunka iyo waxa laga qaban karo.

Suuxdinta guud waa dawooyin keena hurdo qoto dheer oo la mid ah midda dhabta ah. Waxay muhiim u tahay qalliinnada iyo niddaamyada qaar. Inta lagu jiro suuxdinta guud, waad miyir la'dahay oo waxba ma dareemaysid.

Waxaad website-keena ka akhrisan kartaa noocyada kala duwan ee suuxdinta, kuwaas oo looga heli karo luuqado kala duwan halkan:www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages.

## Sidee ayay u egtahay?

- Waxaad dareemi doontaa sidii inaad xanuunsanayso (lalabo).
- Waxaa laga yaabaa inaad xanuunsato (matagto).
- Waxaa laga yaabaa in mantag ku qabto (isku daydo in mantag kaa imaado balse waxba soo bixin).
- Caadi ahaan dareenka xanuunka mantagga wuxuu socdaa saacad ama laba wuxuuna joogsadaa marka la daweeyo. Marar dhif ah wuxuu sii jiri karaa muddo dheer oo ka badan hal maalin.

## Waa sidee suurtagalnimada ay ku dhici karto?

### Laga soo qaaday 100 qof ee kasta



**17 ayaa mantagay** **83-na ma mantagin**

Lamabaradaani waxay ka imaadeen cilmi baarisyo. Waxaad website-keena ka eegi kartaa halka aan ka soo xiganay lambaradeena:www.rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/evidence.

## Waa maxay sababaha lalabo u timaado kadib suuxdin guud?

- Daawooyinka loo isticmaalo suuxdinta iyo qaar ka mid ah daawooyinka xanuun baabi'iyaha waxay kaa dhigi karaan inaad dareento jiro. Qaar ka mid ah suuxdin goboleedka, sida suuxdinta dhabarka iyo epidural-ka(Cirbad xanuun baabi'isa ah oo dhabarka la iska siiyo), waxay sidoo kale keeni karaan xanuun.
- Suuxdintu waxay hoos u dhigi kartaa cadaadiska dhiiggaaga. Cadaadiska dhiigga oo hooseeya wuxuu kaa dhigi karaa inaad xanuun dareento.
- Soomidda (inaan wax la cunin ama la cabin) ka hor qalliinka waxay kaa dhigi kartaa inaad xanuunsato qalliinka kadib, balse waa lagama maarmaan si loogu sugo ammaankaaga/bedqabkaaga inta lagu jiro suuxdinta. Waa in aad raacdaa tilmaan kasta oo lagu siiyo oo ku saabsan joojinta cunista iyo cabitaanka ka hor qalliinka.
- Waxaa suuragal ah inaad si fudud u dareento xanuun haddii aad horey u lahayd madax-wareerka safarka ama aad horey u dareentay xanuun suuxdinta kadib.
- Qaar ka mid ah qalliinnada ayaa u badan inay kugu keenaan xanuun:
  - Qalliinnada lagu sameeyo uur-kujirta (caloosha) ama aagga xubinta taranka
  - Qalliinada hawlaha dumarka (nidaamka taranka dumarka)
  - qalliinnada dhagaha, sanka iyo cunaha, sida ka saarista qumanka(Qanjirrada dhuunta)
  - Qalliinnada lagu saxo weershanimada
  - qalliinnada ka badan laba ama saddex saacadood.
- Welwelku/warwarku wuxuu kordhin karaa halista dareemida jirro. Haddii aad walaacsan tahay ama aad welwelsan tahay, u sheeg dhakhtarkaaga suuxinta. Waxay kaala hadli karaan welwelkaaga. Mararka qaarkood waxay ku siin karaan daawooyin kaa caawiya walaaca.

## Maxaa dhacaya haddii aan jirro dareemo?

Waxaa jira waxyaabo ay kooxda ku daryeesha kuu qaban karaan si aad u dareento fiicnaan haddii aad dareento jirro. Waxey:

- la socon doonaan cadaadiska dhiiggaaga iyo garaaca wadnahaaga si loo hubiyo in cadaadiska dhiiggaagu uusan aad u hoosayn
- ku siinayaan dareere iyo daawooyin ka hortaga jirada, iyagoo marinaya xididka arooraha ama ku siinaya kiniini la liqo.

## Maxaa ka caawin kara in laga hortago jirada?

### Nooca suuxinta

**Dhakhtarka suuxiyahaaga ah ayaa laga yaabaa inuu isticmaalo noocyo kala duwan oo suuxin ah.** Qaar ayaa aad ugu yar inay ku dareensiiyaan jirro. Dhakhtarka suuxinta ayaa kuu sharxi doona nooca suuxinta ee kugu habboon iyo nooca qalliinka ee aad gali doontid.

### Cunista iyo cabitaanka sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah qaliinka ka dib

Waxaa lagugula talin doonaa inaad joojiso cunista iyo cabitaanka ka hor qaliinka. Si kastaba ha ahaatee, wakhti dheer oo cunto iyo cabitaan la aan ah waxay kaa dhigi kartaa inaad xanuunsato qaliinka ka dib. Isku day inaad wax cunto oo cabto isla marka aad awooddo qaliinka ka dib.

Kooxda ku daryeesha ayaa ku siin doonta talo ku saabsan goorta aad mar kale bilaabi karto cunista iyo cabista. Waxa laga yaabaa inay ku siiyaan kabbashooyin yar yar oo biyo ah isla markiiba qaliinka ka dib oo ay kuugu daraan cabitaano kale iyo cunto fudud.

## Maxaan samayn karaa naftayda?

### Ficil u sameey si degdeg ah intii aad gadaal ka samayn lahayd

Weydii kalkaalisooyinkaaga ama dhakhtarka suuxinta isla marka aad dareento xanuun. Way fiicantahay in la daweeyo dareenka lalabada ka hor inta aanu aad u xumaan, sababtoo ah dareenka jirada saa'idka ama xanuunku waxay wax u dhimi karaan bogsashadaada.

**La hadal dhakhtarka suuxinta haddii horay laguu suuxiyay oo aad dareentay xanuun kadib.** Waxaa jira waxyaabo ay samayn karaan si ay u yareeyaan khatarta ah inay mar kale dhacdo.

**Si degdeg ah ha u fadhiisan hana ka kicin sariirta ka dib qaliinkaaga.** Cadaadiska dhiiggaagu wuu is beddeli karaa markaad fadhiisato ama aad dhaqso u kacdo. Tani waxay kaa dhigi kartaa inaad dareento xanuun.

**Haddii xanuun ku qabto, la hadal dhakhtarkaaga suuxinta ama kalkaaliyayaasha.** Xanuun daran ayaa kaa dhigi kara inaa dareento jiro. Waxay ku siin karaan xanuun baabi'iye badan, ama mid ka duwan.

**Si tartiib ah u neefso haddii aad xanuun dareento.**

**Waxaa laga yaabaa inaad tixgeliso daawayn kale.** Daweynta irbad dhaqameedka, duugista cadaadiska ee jirka ama udgoonka dabiiciga ah ayaa laga yaabaa inay kaa caawiyaan ka hortagga lalabada. Ma jiraan cilmi baaris ku filan oo lagu sheego in farsamooyinkani ay shaqeeyaan ama sida ugu wanaagsan ee ay u shaqeeyaan. Waxaad u baahan doontaa inaad adigu diyaarsato xirfadle tababaran haddii aad rabto inaad kuwan tijaabiso.

# Waa wax fiican in la ogaado

## Jirrada safarka

Haddii aad guriga aadeyso isla maalinta qaliinka lagugu sameeyay, waxaa laga yaabaa inaad la kulanto jirro safar. Tani waxay sabab u tahay inaad u nuglaan doonto dhaqdhaqaaqa.

## Afeef
Waxaan aad isugu daynaa in aan macluumaadka ku jira buug yarahaan ka dhigno mid sax ah oo cusub, laakiin taas ma dammaanad qaadi karno. Ma fileyno in macluumaadkaan guud ay dabooli doonto dhammaan su'aalaha laga yaabo inaad qabto ama aad wax uga qabato wax kasta oo muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadashaa doorashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad qabto kooxdaada caafimaadka, adigoo u isticmaalaya buug yarahaan hage ahaan. Buuggan yar oo keligiis ah waa inaan loola qaadan sidii talo. Looma isticmaali karo ujeeddo iib ama ganacsi. Afeef dhamaystiran, fadlan fiiri: [www.rcoa.ac.uk/patient-information-translations-somali].

Dhammaan turjumaadaha waxaa bixiyay bulshada turjubaanada ee Translators without Borders. Tayada turjumaadahaan waxaa loo hubiyaa si ay u noqdaan kuwa ugu saxan ee suurtagal ah, balse waxaa jirta suurtagalnimo khaladaad iyo fasiraad khaldan oo ku jira qaar ka mid ah macluumaadka.

# Noo sheeg maxay kula tahay
Waxaan ku soo dhawaynaynaa talooyinka lagu hagaajinayo buug-yarahanta.

Haddii aad haysid wax faalin ah oo aad jeceshahay Inaad nala waadaagto fadlan ku soo hagaaji: patientinformation@rcoa.ac.uk

**Royal College of Anaesthetists**
Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG

# www.rcoa.ac.uk

Sixth Edition, November 2024
Buug yarahan waxaa dib u eegis lagu samayn doonaa saddex sano gudahood laga bilaabo taariikhda la daabacay.

**© 2024 Royal College of Anaesthetists**
Buug yarahan waxaa lagu nuqulan karaa ujeedada soo saarista agabka macluumaadka bukaanka. Fadlan tixraac ishan asalka ah. Haddii aad rabto inaad qayb ka mid ah buug-yarahaan ku isticmaasho daabacaad kale, waa in la bixiyaa mahadnaq ku habboon waxaana laga saarayaa calaamadaha, sumadaha, sawirada iyo astaamaha. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir.